King County

Qaybta Naafonimada Koritaanka iyo Taageerada Carruurta Yaryar (DDECSD)
Codsiga Barnaamijka Iskuulka-ilaa-Shaqada (S2W)

Taarii khda		**Degmada Iskuulka**		**Magaca Macalinka**	
Magaca Iskuulka/Barnaamijka				**Sannadka Ka-bixidda**	

MA DEGGAN TAHAY DEGMADA KING? ☐ Haa ☐ Maya Haddii ay maya tahay, qor degmada aad ku nooshahay: _____

Magaca Ardeyga: _____
Magaca Dambe | Magaca Koowaad | Xarafka Hore ee Magaca Dhexe | Magaca La Doorbidayo

Cinwaanka: _____
Waddada | Magaalada | Summada Degaanka

Xiriirka: _____
Telefoonka Guriga | Telefoonka Gacanta | E-Mail

Mas'uulkeenna Sharciga ah? ☐ Haa ☐ Maya

XIRIIRKA AASAASIGA AH / MAS'UULKA / QOFKA TAAGEERADA: (Waa in lagu daraa mas'uulka haddii ardeyga uusan ahayn mas'uulkeenna)

Magaca	Xiriirka uu la leeyahay ardeyga	Telefoonka Aasaasiga ah	Ciwaanka e-Mail-ka

MACLUUMAADKA DADKA

TAARIIKHDA DHALASHADA: _____
Bisha Maalinta Sannadka

JINSIGA: ☐ Lab ☐ Dheddig

☐ Doorbidaya in aan is-qeexo: _____

☐ Doorbidaya in aanan sheegin

Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada Maamulka Naafonimada Koritaanka MACLUUMAAD

Xaaladda DSHS/DDA: (√ dhammaan kuwa ku habboon)

Hadda ma tahay macmiilka DDA: ☐ Haa ☐ Maya

☐ Codsanaya / Dib-u-codsanaya / Racfaan-ka-qaadanaya

Haddii aadan hubin, wac 206-568-5700

Magaca Maareeyaha Kiiska (haddii la garanayo): _____

KOOXDA ISIRKA/SINJIGA (√ dhammaan kuwa ku habboon)

☐ **Caddaan** ☐ **Hindida Mareykanka iyo Dadka Asal Ahaan u Dhashay Alaska**

☐ **Madow / Afrikaan Mareykan ah** ☐ **Aasiyaan/Aasiyaan Ameerikan**

☐ **Hisbaanik/Laatiin** ☐ **Hawaayaan dhalad ah iyo Dadka Ka-soo-jeeda Jasiiradaha Baasifigga**

☐ **Isirka Aan La Qorin:** _____

Luuqadda La Doorbidayo: _____

ASL: ☐ **Haa** ☐ **Maya**

Tarjumaan La Codsadey: ☐ **Haa** ☐ **Maya**

Kuwo kale: _____

Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada Waaxda Tababbarada Farsamo iyo Kuwa Mihnadeed MACLUUMAAD

Miyaad ka codsatey DSHS/DVR: ☐ Haa ☐ Maya

Magaca La-taliyaha DVR (haddii la garanayo): _____

DAKHLIGA IYO DHEEFAHA DAMMAANADA BULSHADA

Miyaad qaadaneysaa Dheefaha Damaannada Bulshada:

☐ Haa ☐ Maya

Qaddarka: $_____

MAGACA ARDEYGA: _____
Magaca Dambe Magaca Koowaad Xarafka Hore ee Magaca Dhexe

OGGOLAANSHAHA / CADDEYNTA ARDEYGA

- Waxaan ballan-qaadayaa in macluumaadka codsigan ku qoran in uu yahay mid run ah inta aan ogahay. Waxaan ogganahay in uu qof eegi karo macluumaadka iyo in uu i weyddiin karo dokumentiyo dheeri ah. Waxaan sidoo kale ka warqabaa in haddii macluumaadka uusan run ahayn, in la iga saari karo barnaamijka haddii la igu helo in aanan xaq u lahayn ama waxaa laga yaabaa in la ii dacwadeeyo khiyaanno iyo/ama been ku dhaarasho haddii aan si kas ah ugu been-sheego codsiga. Waxaan oggolahay in macluumaadkan la adeegsado si loo arko haddii aan xaq u leeyahay. Waxaa la isiin doonnaa macluumaad ku saabsan fursadda loo siman yahay iyo xuquuqaha rafcaanka iyo Xeerka Asturnaanta ee 1974, marka aan codsado.

- Waxaan u oggolahay in Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada, Maamulka Naafonimada Koritaanka(DSHS/DDA) uu macluumaad siiyo Qaybta Naafonimada Koritaanka iyo Taageerada Carruurta Yaryar ee Degmada King (DDECSD) si loo arko haddii aan xaq u leeyahay iyo si la iiga taageero in aan adeegyo helo. Macluumaadka oo dhan waxaa laga dhigi doonaa mid qarsoodi ah.

- Waxaan oggolahay DDECSD in ay ila soo xiriirto ka-dib marka uu barnaamijkan dhammaado si ay ii siiso adeegyo kale iyo si ay ii weyddiiso cawaaqibta muddada-dheer ee ka-qaybgalka Barnaamijka Iskuulka-ilaa-Shaqada (S2W)

SAXIIXA MAS'UULKA AYAA HOOS LOOGU BAAHAN YAHAY

- Waxaan u oggolahay DDECSD in ay ardeygeyga ka caawiso sidii uu shaqo u heli lahaa.

- Waxaan oggolahay isdhaafsiga macluumaadka ee ay isdhaafsanayaan DDECSD iyo iskuul kasta, degmada iskuulka, ama kuleejka ee uu ardeygayga dhigto ama uu ku qoran yahay. Isdhaafsigan ayaa loo oggolaadey macluumaad kasta ee ku habboon guusha ka-qaybqaadashada ardeygayga ee Barnaamijka S2W iyo hawlaha la xiriira. Waxaan fahamsanahay in ay ku jiri karaan natiijooyinka imtixaanka ee jaango'an, darajooyinka qoran ee ardeyga u diiwaangala, diiwaannada imaanshaha, warbixinnada waxqabadka iyo macluumaadka ka yimaada la-taliyeyaasha, macalimiinta, iyo shaqaalaha kale.

- Waxaan bixinayaa fasaxa uu si buuxda ardeygeyga ugu qaybqaadanayo waxqabadyada la-talinta ee la xiriira waxbarashada, tababarka, iyo shaqada ee ay bixiso DDECSD.

- Waxaan bixinayaa fasax uu ardeygeyga kaga qaybqaadanayo kuna aadayo safarada gudaha lagu tago ee waxbarashada, shaqada, iyo tababarka ama waxqabadyada ay qabanqaabisay DDECSD.

- Waxaan bixin doonnaa macluumaad caafimaad kasta ee ku caawinaya qaybta DDECSD in ay adeegyo siiso ardeygeyga (kuddar caqabado kasta ee jireed, dhimir, ama dareen, xasaasiyado, iyo sidoo kale daawooyin la qoro ee uu ardeygaaga qaadanayo).

  Qeex: _____

- Waxaan oggolahay isticmaalka magaca ardeygeyga iyo waxyaabaha la mid ah ee lagu adeegsado bandhigyada guud ama warbaahinta si kor loogu qaado wacyiga bulshada ee barnaamijyadeenna.

SAXIIXYADA

Ardeyga _____ Taariikhda: _____

Mas'uulka _____ Taariikhda: _____
(haddii aan ardey ahayn)

King County

HESHIISKA SIIDEYNTA MACLUUMAADKA

Magaca Ardayga: _____

Magaca Dambe Magaca Koowaad Xarafka Hore ee Magaca Dhexe

Waxaan fasax siinayaa hay'adda hoos lagu calaamadeeyay:

X	Waaxda Adeegyada Aadanaha iyo Bulshada ee Degmada King	Qaybta Naafonimada Koritaanka iyo Taageerada Carruurta Yaryar (DDECSD)
X	Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington	Qaybta Tababbarada Farsamo iyo Kuwa Mihnadeed (DVR)
X	Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington	Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA)
X	Waaxda Adeegyada Indhoolaha ee Gobolka Washington	
X	Degmooyinka Gobolka Washington: deganaansho hore, hadda, ama mustaqbalka	
X	Maxkamadda Dhallinyarada, Waaxda Asluubta	
X	Ururka Midowga Dhammaan Qabiillada Hindida	
X	Iskuulka(iskuullada) Dowladda ama Kuwa Gaarka loo leeyahay ee uu dhigtay	
X	Kuliyadaha bulshada ee uu codsadey iyo/ama dhigtay	
X	Barnaamijyada Farsamada Xirfadeed ee uu codsadey iyo/ama dhigtay	
X	Shirkadaha Shaqaaleynta ee qandaraaska la galey DDECSD	
X	Ururrada U-qareemeynta	Jeegaanta Degmada King, Albaabada Furan ee Qoysaska Dhaqamada Kala-duwan
X	Bixiyaha Adeegyada Degaanka ama Guriga Qoyska ee Qaangaarka	
X	Shirkadaha Kaalmada Farsamo ee qandaraaska la galey DDECSD	

Si loo siidaayo macluumaadka maaliyadeed ama mid kasta oo kale ee lagama maarmaanka ah ee ku saabsan qorsheynta iyo bixinta adeegyada mihnadeed

X	Waaxdada Adeegyada Aadanaha iyo Bulshada ee Degmada King	Qaybta Naafonimada Koritaanka iyo Taageerada Carruurta Yaryar (DDECSD)
X	Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington	Qaybta Tababbarada Farsamo iyo Kuwa Mihnadeed (DVR)
X	Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington	Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA)
X	Waaxda Adeegyada Indhoolaha ee Gobolka Washington	
X	Degmooyinka Gobolka Washington: deganaansho hore, hadda, ama mustaqbalka	
X	Maxkamadda Dhallinyarada, Waaxda Asluubta	
X	Ururka Midowga Dhammaan Qabiillada Hindida	
X	Iskuulka(iskuullada) Dowladda ama Kuwa Gaarka loo leeyahay ee uu codsadey iyo/ama dhigtay	
X	Kuliyadaha bulshada ee uu codsadey iyo/ama dhigtay	
X	Barnaamijyada Farsamada Xirfadeed ee uu codsadey iyo/ama dhigtay	
X	Shirkadaha Shaqaaleynta ee qandaraaska la galey DDECSD	
X	Ururrada U-qareemeynta	Jeegaanta Degmada King, Albaabada Furan ee Qoysaska Dhaqamada Kala-duwan
X	Bixiyaha Adeegyada Degaanka ama Guriga Qoyska ee Qaangaarka	
X	Shirkadaha Kaalmada Farsamo ee qandaraaska la galey DDECSD	

Waxaan fahamsanahay in macluumaadkani laga dhigi doonno mid qarsoodi ah iyo in aysan saameyn doonin adeegyadeyda Qaybta Naafonimada Koritaanka iyo Taageerada Carruurta Yaryar ee Degmada King.

_____ _____

Saxiixa Ardeyga Taariikhda

_____ _____

Saxiixa Mas'uulka (haddii uusan ahayn ardey) Taariikhda

King County
Department of Community and Human Services
Developmental Disabilities and Early Childhood Supports Division
401 Fifth Avenue, CNK-HS-0500
Seattle, WA 98104
Telefoonka: 206-263-9105
TTY: 711
FAKIS: 206-205-1632
www.kingcounty.gov/ddd/

Oggolaanshaha Sawirka iyo Siideynta

Hab-dhaqannada Ugu Wanaagsan ee Iskuulka-ilaa-Shaqada: Buug-yarayaal, Agab Xayaysiin, Fiidiyowyo iyo Sheekooyinka Guusha.

_____
Magaca Ardayga

_____
Cinwaanka

_____
Magaalada, Gobolka, Summadda Degaanka

Waxaan halkan ku oggolaanayaa oo aan ku bixinayaa fasaxeyga horumarsan si aan u adeegsado oo aan mar kale u soosaaro dhammaan sawirrada aniga la iga qaadey iyadoo ujeeddadu tahay in lagu adeegsado bogagga internet-ka, daabacaad, bandhig, bandhigyo fiidiyow ah, iyo xayaysiinta Degmada King. Waxaan fahamsanahay in dhammaan faylasha dijitaalka ah, muuqaallada sawirrada muujinaya ifka iyo harka sawirka asalka, muuqaallada leh ifka ama harka, daabacaadaha iyo kuwa wax laga dhex arki karo ayaa noqon doonna hantida Degmada King waxaanna la adeegsan karaa oo dib loo soosaari karaa iyadoon magdhow la isiin. Sawirrada Degmada King waa kuwo ku jira baraha dadweynaha oo looma sameysan karo xuquuq daabacaad ama ganacsi ahaan looma adeegsan karo. Tusaalooyinka isticmaalka waxaa ku jira, laakiinse aan ku koobnayn buugyarayaasha, fiidiyowyada, sheekooyinka guusha, agabka madasha sharci-dejinta, iyo bogagga internet-ka.

Waxaan halkan ugu fasaxayaa ama uga qaadayaa Degmada King iyo qoraaga dhammaan xaq-sheegashooyin kasta iyo dalabaadyada ka imaanaya ama la xiriira isticmaalka sawirrada iyo qoraallada, oo ay ku jiraan xaqsheegashooyin kasta ee loogu talagalay qoraalka been-abuurka ah.

☐ **Waxaan ahay 18 sano jir ama ka weyn**

_____ _____
Saxiixa Ardeyga Taariikhda

BUUXI HADDII QOFKU UU KA YAR YAHAY 18 SANO JIR ama uu leeyahay qof ka mas'uul ah
Waxaan caddeynayaa in aan ahay mas'uulka qofka la sheegay waxaanna bixinayaa oggolaanshaheyga iyadoon laga gaabsan isticmaalka iyo dib-u-soosaaridda sawirrada la qeexay ee Degmada King/Metro.

_____ _____
Saxiixa Mas'uulka (haddii uusan ahayn ardey) Taariikhda

In kastoo fasaxyada qofka aan caadi ahaan loogu baahnayn sawirrada wararka iyo saxaafadda la xiriira, waxay yareyn karaan mas'uuliyadda Degmada King ee duulaanka asturnaanta. Foomamka looguma baahna: kooxaha munaasabadaha dadweynaha, shaqaalaha Degmada King ee gudanaya waajibaadyo rasmi ah, iyo sawirrada wararka (haddii loo arki karo kuwo keenaya ceeb mooyaane). Fasaxyada ayaa loogu baahan yahay sawirrada lagu adeegsado internet-ka. Haddii la codsado in aanan masawir laga qaadin shakhsi gaar ah, sawir-qaadaha waa in uu u hoggaansamaa. Marka ay suuragal tahay, masawir-qaadaha waa in uu ku wargeliyaa kuwa sawirrada laga qaadey ujeeddooyinka guud ee laga leeyahay masawirrada. Haddii qof uu doonayo in uu xadiddo isticmaalka daabacaadyo gaar ah ama ujeeddooyin kale, tani waa in lagu xusaa foomka oggolaanshaha waana in uu xarfaha hore ee magacooda ku qoraan qofka iyo masawir-qaadaha. Foomamka oggolaanshaha ee la saxiixay waa in ay hay'adda haysaa inta ay faylasha dijitaalka ah, kuwa wax laga dhex arko, kuwa la daabacey ama muuqaalada sawirka ee muujinaya ifka iyo harka ay hayso Degmada King.

King County

Department of Community and Human Services

Developmental Disabilities and Early Childhood Supports Division

Macluumaadka Barnaamijka Iskuulka-ilaa-Shaqada ee Degmada King (S2W) ee loogu talagalay Ardeyda, Qoysaska, Mas'uuliyiinta, iyo Taageerada Muhiimka ah

Waa muhiim in dadka muhiimka u ah nolosha ardeyga ay fahmaan fursadaha iyo mas'uuliyadaha Barnaamijka S2W ee Degmada King, oggolaadaan in ay taageeraan yoolalka ardeygooda, iyo in ay ka qaybgalaan tallaabooyinka jidka loo maro helidda shaqo mushaar leh. Dokumentigan wuxuu ku siinayaa su'aalaha inta badan la iska weydiiyo Barnaamijka S2W wuxuunna qeexayaa doorarka iyo mas'uuliyadaha ardeyda iyo dadka taageeraya ee muhiimka ah.

Waa maxay mas'uuliyadaha qoyska/shakhsiga(shakhsiyaadka) taageeraya ee muhiimka ah iyo ardeyga?

- Baro sida barnaamijka uu u shaqeeyo oo oggolow in aad wax ka barato mowduucyadan soo socda maadaama ay la xiriiraan yoolalka shaqada ee ardeyga.
    - Dheefaha Damaannada Bulshada, Dhiirrigelinta Shaqada, iyo Shaqada / Medicaid iyo Shaqada
    - Maalgelin loogu talagalay Adeegyada Shaqaaleynta Xarafka Hore ee Magaca_____
- Ka-qaybgal munaasabadaha gaarista bulshada si aad wax uga oggaato kala-guurka min iskuul ilaa adeegyada dadka waaweyn, faham barnaamijka Iskuulka-ilaa-Shaqada, oo ku xiran Hay'adaha Adeegga Shaqaaleynta ee Iskuulka-ilaa-Shaqada. Xarafka Hore ee Magaca_____
- **Si dhow ula shaqee Degmadaada**. Ogow haddii degmadu ay dooratey Hay'adaha Adeegga Shaqaaleynta si ay ula shaqeyso dhammaan ardeyda iyadoo loo marayo qaabka ku dheggan. Xarafka hore ee magaca _____
- Haddii kale, ardeyga iyo qofka(shakhsiyaadka) taageerada muhiimka ah waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay **wareystaan saddex Hay'adood oo kuwa Adeegga Shaqada ah ee ay doonayaan in ay la shaqeeyaan** iyo in ay la kulmaan la-taliyahooda shaqada (tababbare, takhasusle). Ardeyda ka-qaybgaleysa Ururrada Shaqada (Job Foundations) waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay doortaan Hay'ad Deyrta kala-guurkooda **sannadka labaad-ilaa-kan-ugu-dambeeya**. Dhammaan ardeyda waxaa lagu dhiirrigeliyaa in Hay'adooda ay doortaan **kama-dambeys xagaaga ka horreeya** sannadkooda ugu dambeeya ee kala-guurka Xarafka hore ee magaca _____
- Ardeyda waxay **mas'uul ka noqon doonnaan gaadiidka ay raacayaan** iyadoo mudnaan la siinay sida loo isticmaalo gaadiida bulshada sida Metro ama Access, ka hor inta aysan shaqada helin. Xarafka hore ee magaca _____
- **Waalidiinta iyo shakhsiyaadka kale ee muhiimka ah waa in ay qayb ka noqdaan hannaanka kobcinta shaqada** ee loo marayo wadaagista fikradaha hal-abuurka, isku-xirrada bulshada, iyo macluumaadka xiriirka ee hoggaanka suuragalka ah madka loo baahdo. Dadka intooda badan waxay shaqadooda ugu horreysa helaan iyagoo u maray xiriir qoys! Xarafka hore ee magaca _____
- **Ardeyda <u>waa in ay</u> ku qornaadaan iskuulka:**
    - Hawlwadeennada iskuulka waxay bixiyaan tababar iyo taageero shaqo barasho; waxay keliya sidaan sameyn karaan haddii ardeyda ay ku qoran yihiin iskuulka. Shaqooyinka waxaa loogu dari karaa sida qayb ka mid ah maalinta iskuulka ardeydanna waxay dhowr saacadood ku qaadan karaan fasalka. Xarafka hore ee magaca _____
    - Mararka qaarkood ardeyda waxay lumiyaan shaqooyinkooda ugu horreeya waxayna u baahan yihiin in ay dib ugu soo noqdaan degmada si ay u helaan adeegyo ilaa ay ka helaan shaqo kale. Xarafka hore ee magaca _____

Sidee ayay dhammaan xoogagga kala duwan u wada shaqeeyaan?

Barnaamijkan wuxuu u baahan yahay qaab kooxeed! Xubnaha kooxda ee muhiimka ah waxaa ka mid ah ardeyga, qoyskooda/shakhsiga(shakhsiyaadka) taageerada ee muhiimka ah, macalinkooda iyo hawlwadeennada kale ee iskuulka, Hay'adaha Adeegga Shaqaaleynta, La-taliyaha Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington Qaybta Tababbarada Farsamo iyo Kuwa Mihnadeed (DSHS/DVR), iyo Maareeyaha Kiiska ee Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA).

- **Sameynta war-isgaarsiin furan iyo filashooyinka cad ayaa aasaasi u ah guusha.** Waa muhiim in aad xiriir wanaagsan la yeelato Hay'adaada Adeegga Shaqaaleynta, sidaa daraadeed waxaad ka hadli kartaa arrimaha ka hor inta aysan dhibaato kugu noqon. Ha oggaadaan dookhaaga iyo filashooyinkaaga bilowgii horeba. Arrimaha intooda badani waa war-isgaarsiin-xumo fudud. Noqo qof firfircoon oo wac si aad ula xiriirto haddii aad ku jahwareerto geeddi-socodka. Arrimaha kale waxaa sabab u noqon kara farqiga u dhaxeeya sida adeegyada dadka waaweyn iyo adeegyada iskuulka loo bixiyo. Xarafka hore ee magaca _____

- **Xubnaha kooxda waxaa loo baahan yahay in ay si joogto ah u wada kulmaan una wadahadlaan** si ay u sameeyaan maskax-shiil, u sameeyaan istiraatiijiyado, iyo si ay ugu wada gorgortamaan mas'uuliyadaha ku saabsan tababarka iyo kobaca shaqada. Inkastoo **ay jiri doonnaan kulanno rasmi ah** oo lala yeelanayo hawlwadeennada kala duwan oo ay ka mid yihiin Hay'adda Adeegga Shaqaaleynta iyo DVR, ardeyda iyo shakhsiga (shakhsiyaadka) taageeraya qoyska waa in ay bilaabaan weyddiisashada kulan haddii ay jiraan su'aalo ama walaacyo. **Hay'add Adeegga Shaqaaleynta waxaa laga doonayaa in ay bixiso warbixinta waxqabadyada bilaha ah oo qoran iyo horumarka ardeyga iyo kooxdooda taageerada.**
  Xarafka hore ee magaca _____

Maxaa dhacaya marka ardeyga uu shaqo helo?

Hay'adaha Adeegga Shaqaaleynta waxay si dhow ula shaqeyn doonnaan loo-shaqeeyaha iyo ardeyga. Waxay ardeyda siin doonnaan **tababar dheeraad ah oo lagu qaato shaqada gudaheeda** si ay ugu madax-bannaanaadaan intii suuragal ah hawlaha oo dhan. **Walaacyada bedqabka iyo kormeerka** ayaa wax laga qaban doonnaa; haseyeshee, dadka waxaa lagu dhiirrigelin doonaa in ay qaataan **halisaha macquulka ah** iyo in ay diyaariyaan istiraatiijiyadaha taageerada dabiiciga ah. Sida ay u badan tahay in ardeyda ay madax-bannaani bartaan waa sida ay u badan in ay helaan fursado badan.
Xarafka hore ee magaca _____

Jadwallada iyo hawlaha maalinlaha ah ayaa isbeddeli kara marka ardeyga uu shaqo bilaabo. Kooxda ardeyga ayaa ku caawin kara adiga oo sii wadaya in aad hadasho ama bixiso taageero kale iyadoo loo marayo isbeddeladan iyo xoojinta qiimaha iyo muhiimadda ay shaqadu leedahay.
Xarafka hore ee magaca _____

- **Jadwallada shaqada** waxaa ku jiri kara saacadaha fiidka iyo/ama maalmaha fasaxa ee toddobaadka. Ardeyda waxaa la fili karaa in ay shaqo aadaan xitaa haddii uu iskuulku u xiran yahay sababo la xiriira cimilada, fasaxyo, ruqsayn hore, iwm.
    - Ardeyda waa in loo taageeraa sida loo baahan yahay si ay si toos ah ula hadlaan kuwa ay u shaqeeyaan haddii ay **xannuunsan yihiin, soo daahaan ama ay rabaan in ay codsadaan waqti fasax ah oo ay ku aadaan fasaxyo ama munaasabado gaar ah.**
      Xarafka hore ee magaca _____
    - **Jadwallada shaqada waxay isku dhaci karaan waxqabadyada iskuulka, sida in meelo loo aado madadaallo, isku-imaanshaah, xafladaha maalinta dhalashada, iwm.** Waa suuragal in maalmaha qaar fasaxooda lga gorgortamo; laakiinse haddii kale, waxaan weyddiisan karnaa in kooxdu ay taageerto in ardeyda ay doortaan shaq iyo in ay helaan siyaabo lagu isticmaali karo lacagta la kasbadey ama waqtiyo kale oo fasax ah si loo arko isku dheelitirka nolosha/shaqada wanaagsan. Xarafka hore ee magaca _____

- Ardeyda waxay u baahan karaan in ay raacaan **sharciga lebbiska** ama in ay ku xirtaan lebbis yunifoom ah goobta shaqada. Waxay caawimaad ugu baahan karaan guriga si loo hubiyo in ay waqti habboon soo kacaan, qubeystaan, oo ayna helaan dhar ku habboon oo nadiif ah, iyo in muuqaalkooda iyo nadaafadooda shakshiyeed in ay ku habboon tahay goobtooda shaqada. Mar kasta oo ay suuragal tahay ardeyda ku dhiirrigeli in ay ka qaybgalaan hawlahan!
  Xarafka hore ee magaca _____

- **Shaqada waxaa laga yaabaa in aysan maalinta ama toddobaadka ardeyga u buuxin si la mid ah sidii iskuulka.** Inkasta oo ardeyda lagu dhiirrigeliyo in ay u shaqeeyaan si u dhow waqti buuxa intii suuragal ah, ardeyda intooda badani waxay ku bilaabaan shaqooyin ku-meelgaar ah. Inkastoo yoolka aasaasiga ah ee barnaamijka uu yahay shaqo mushaarka leh, ardeyda iyo qoyskooda/shakshiga(shakhsiyaadka) taageerada ee muhiimka ah waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay u adeegsadaan sannadka ugu dambeeyay ee iskuulka **diyaarinta qorsheyaal iyo kheyraadyo oo dheeri ku ah shaqada** si loogu abuuro nolol buuxda oo macno leh ardeyga ka-dib marka uu iskuulka dhammaado. Xarafka hore ee magaca _____

Barnaamijka S2W miyuu ballanqaadayaa in ardeyda oo dhan ay helaan shaqada ay doonayaan?

- **Barnaamijkan ma damaanad-qaadayo in ardeyda oo dhan ay iskuulka ugu baxaan shaqo.** Wuxuu bixinayaa fursado ku aaddan yoolkan inta uu ardeyga uu weli ku sugan yahay iskuulka. Haddii ardeyda uusan iskuulka ugu bixin shaqo, waxay xiriir la yeelanayaan hay'adaha adeegga muhiimka ah si loogu abuuro qorshaha iskuulka ka-dib. Xarafka hore ee magaca _____
- Waxaan ardeyda iyo kooxdooda taageerada ku dhiirrigelinaynaa in ay ka shaqeeyaan helidda shaqo wanaagsan oo habboon, dhisidda taariikhda shaqada iyo waxbarashada iyo qaadista tallaabooyinka ku aaddan dariiqa shaqada. **Sida badankeenna oo kale, shaqada koowaad ee ardeyga caadi ahaan ma ahan shaqada riyadooda ah, laakiinse waa tallaabo koowaad.** Xarafka hore ee magaca _____
- **Barnaamijkan ma ballanqaadayo helitaanka maaliyad muddo-dheer.** Barnaamijka waxaa maalgeliya DDECSD iyadoo la adeegsanayo maaliyadaha inta mayl ee la socdey ee Degmada ee xaddidan ilaa dhammaadka sannad dugsiyeedka. DSHS/DVR waa la-hawlgallaha maalgeliya barnaamijka S2W, laakiinse ma bixiyaan maalgelinta loogu talagalay taageero muddo-dheer. Taageeradan waxay muhiim u noqon kartaa ilaalinta shaqada waxayna aasaasi u noqon kartaa dhisidda dariiqa shaqada. **Ardey kasta iyo/ama qoyskooda/shakhsiga(shakhsiyaadka) taageeraya ee muhiimka ah waxaa laga doonayaa in ay wax ka bartaan ikhtiyaaradooda maalgelinta ee muddada-dheer oo ay ku jiraan DSHS/DDA.** Xarafka hore ee magaca _____

Ardeyga ma beddeli karaa hay'adda adeegiisa bixis ama maka bixi karaa barnaamijka?

- Ardeyda waxay dooran karaan in ay beddelaan bixiyeyaasha midkood inta lagu guda jiro ama ka-dib barnaamijka S2W. Haseyeeshee, beddelidda adeeg bixiyeyaasha inta lagu guda jiro barnaamijka S2W waqtigeeda kooban ayaa si xub u saameyn kara adeeg-bixin. Helitaanka adeeg-bixiyeyaal cusub lama damaannad-qaadin. Waxaan weyddiisaneynaa in ardeyda iyo kooxdooda taageerada **ay waqti ku qaataan wareysiga ugu yaraan 3 Hay'adood oo kuwa Adeegga Shaqaaleynta** ama **in ay si dhow ula shaqeeyaan Degmadooda iyagoo kaashanayao** hay'ad la hawlgasha. Xarafka hore ee magaca _____
- **Adeegyada Barnaamijka S2W ma ahan xuquuq**. DDECSD sharciga kuma waajibinayo in ay adeegyadan bixiso. DDECSD ayaa weyddiinaysa ardeyda iyo kooxdooda taageerada in ay si fiican u tixgeliyaan xaq-u-yeelashada iyo shuruudaha ka-qaybgalka ee barnaamijka ka hor isqoritaanka. Waa muhiim in ardeyga iyo kooxdooda taageerada ay doonayaan in ay helaan adeegyada shaqada iyo in ay oggolaadaan in ay si firfircoon ugu qaybgalaan barnaamijka. Xarafka hore ee magaca _____
- Haddii ardeyga ama kooxdiisa taageerada ay dareemaan Hay'adda Adeegga Shaqaaleynta aysan bixineyn adeegyada muhiimka ah, inkastoo ay bixiyeen dedaallo caqligal ah oo ay kula hadlaan, waa mas'uuliyadooda in ay **ku wargeliyaan Maareeyaha Barnaamijka S2W**. Maareeyaha barnaamijka ayaa kooxda kala shaqeyn doonta xallinta xaaladda. Haddii xal aanan la helin, maareeyaha barnaamijka wuxuu ardeyda iyo kooxdooda taageerada siin doonaa ikhtiyaarada adeegyada taageerada iyadoo loo marayo hay'ad kale. Xarafka hore ee magaca _____
- DDECSD ayaa weyddiisaneysa in shakhsi(shakhsiyaad) kasta ee taageerada aasaasiga ah ee ardeyga in uu wax ka barto barnaamijka, in uu ka-qaybgalo, oo taageero yoolalka shaqaaleynta ardeyga. Haddii inta lagu guda jiro barnaamijka Hay'adda Adeegga Shaqaaleynta ay oggaato ardeyga ama kooxdooda taageerada aysan taageeri doonin yoolalka shaqaaleynta ardeyga, in kastoo la sameeyay dedaallo macquul ah oo lagu la hadlayo, adeeg bixiyaha wuxuu **ogeysiin doonaa Maareeyaha Barnaamijka S2W** kaas oo isku-dayi doonna in uu xaliyo arrinka. DDECSD waxay xaq u leedahay in ay joojiso adeegyada lacagbixinta ilaa xaaladda laga xalliyo. Xarafka hore ee magaca _____

Waxaan akhriyey codsiga Iskuulka-ilaa-Shaqada oo dhan. Waxaan fahamsanaahy oo aan oggolahay mas'uuliyadaha waalidka/mas'uulka/shakhsiga taageeraya ee muhimka ah iyo ardeyga.

_____	_____
Saxiixa Ardeyga	Taariikhda
_____	_____
Saxiixa Shakhsiga Taageerada ee Aasaasiga ah	Taariikhda
_____	_____
Saxiixa Mas'uulka (haddii uu yahay ardey kale ama taageerada aasaasiga)	Taariikhda

Si Aad u soo Gudbiso Codsigaaga

Fadlan iimayl u dir S2Wreports@kingcounty.gov, ama boostada kuddir

Department of Community and Human Services
Developmental Disabilities and Early Childhood Supports Division
401 Fifth Avenue, CNK-HS-0500
Seattle, WA 98104

Maareeyayaasha Barnaamijka S2W

Richard Wilson
Maareeyaha Barnaamijka
Telefoonka: 206-263-9044
Richard.Wilson@Kingcounty.gov

Emily Hart
Maamulaha Barnaamijka
Telefoonka: 206-477-7661
Emily.Hart@Kingcounty.gov

Cassie Glenn
Maamulaha Barnaamijka
Telefoonka: 206-263-7999
cglenn@kingcounty.gov

TJ Protho
Maamulaha Barnaamijka
Telefoonka: 206-930-2496
tprotho@kingcounty.gov